

**KNOW YOUR RIGHTS***With Law Enforcement*

- Xaq ayaad u leedahay inaad aamusto diidona inaad ka jawaabto wax su'aalo ah oo ay ku waydiiyaan qolyaha dhaqan-gelinta sharcigu(Booliska).
- Wakaaladaha dhaqan-gelinta sharcigu waa inay haystaan waaran sax ah oo u oggolaanaya inay gurigaaga soo galaan baadhaana.
- Ajaanibka waajib kuma aha inay ka jawabaan su'aalaha la xidhiidha xaaladooda socdaal. Been haka sheegin muwaadinimadaada hana la iman dukumeentiyo been ah.
- Hadii lagu xidho,codso inaad la hadasho abukaat, intaa ka dib ha la hadlin booliska ilaa intaad kala kulmayso abukaataha.
- La xidhiidh CAIR si aad usoo sheegto caga-juglaynta iyo takooridda boolisku kugu sameeyo.

KOOBAN



MACLUUMAADKANI MAAHA IN LOO TIXGELIYO TALO SHARCI.

**KNOW YOUR RIGHTS***With Law Enforcement*[WWW.CAIR.COM](http://WWW.CAIR.COM)

Council on American-Islamic Relations

## XUQUUQDAADA MARKA AAD LA KULANTO IYADOO SHARCIGA LA DHAQAN GELINAYO.

- + Xaq ayaad u leedahay in aad ka aamusto diidona in aad ka bixiso wax jawaabo ah su'aalo la xidhiidha dhaqan-gelinta sharciga (madaniga, goboleed, ama heer federaal). Diidmada jawaabista laguuma isticmaali karo mana tusayso in aad wax qarinnayso. Dhaqan gelinta sharcigu waxay ku waydiin kartaa aqoonsigaaga ama diiwaangelinta gaadhigaaga. Laakiin joojintaasi waa mid gaaban su'aalo kale laguuma waydiin karo.
- + Waxa aad xaq u leedahay in aad soo xaadiriso abukaate ama sharciyaqaan marka aad la hadlayso dhaqan gelinta sharcig (madaniga, goboleed, ama heer federaal) xitaa hadii aanad xidhnayn ama dhib ku jirin. Xuquuqdaas waxa leh dhamaan shaqsiyaadka, muwaadiniinta iyo ajaanib.
- + Ajaaniibka waajib kuma aha inay ka jawaabaan su'aalo la xidhiidha xaaladooda socdaal. Ha ka been sheegin muwaadini-madaada hana gudbin dukumeentiyo been ah. Iska ilaali qaadashada aqoonsiyada beenta ah.
- + Wakaaladaha dhaqan-gelinta sharcigu waa in ay haystaan ogolaansho baadhitaan si ay u soo galaan gurigaaga. Hadday dhahaan waan haysanaa waaran ama ogolaansho codso in aad aragto inta aanad u ogolaan soo gelista. (Daaqadda ha kaa tusaaan, ha ka soo dusiyaan albaabka hoostiisa, iwm.) Waaranku wuxu caddaynaya waxa la raadinayo waana inuu saxeeaa xaakin. Haddii waaranku aanu dhamays tirnayn ama aad qalad aragto, waxa aad tidhaahdaa "Ma ogoli baadhitaan". Muxtarim iyo akhlaaq lahaw xusuusnowna in aad xaq u leedahay in aad aamusnaan karto. Haddii aad leedahay abukaate, la xidhiidh sharci yaqaankaaga si degdeg ah teleefankana ku jir inta lagu baadhayo. Qoro, ama duub, wixii la

qaaday iyo intii la baadhay bale ha faro gelin baadhista. Waaranka baadhistu ma ogolaanayo ama xaq siin maayo in lagu xidho. Si kastaba ha ahaatee, way ku xidhi karaan iyagoo eegaya alaabta baadhista lagu helay. Ha diidin xadhiga.

- + Been-sheegid, marin habaabin, ama sheegist hadalo aan is qaadanayn ee loo sheego dhaqan gelinta sharciga waa dembi, waana in aan la samayn xaalad kasta oo jirta.

## WAXA AY TAHAY INAAD SAMAYSO HADDAY DHAQAN-GELINTA SHARCIGU KUU YIMAADAAN:

- + Haddii aad guriga joogto, debedda u bax albaabkana soo xidh inta aanad la hadlin.
- + Haddii aad shaqada joogto, Ka kaxee meeshaada khaaska ah ee shaqo.
- + Haddii lagu soo waco, aad meel aamusna oo bilaa buuq ah.
- + Waydii sarkaalka ama se wakiilka kaadhkooda shaqada amase magaca wakaladooda, magaca sarkaalka/ wakiilka, telefoon amase email.
- + Dabadeed si xushmad leh u dheg "Sharci-yaqaankayga ayaa kula soo xidhiidhaya" dhameena wada hadalka.
- + La soo xidhiidh CAIR si degdeg ah si aad u hesho caawimaad sharci.

## WAXAY AY TAHAY INAAD SAMAYSO HADII AY DHAQAN GELINTA SHARCIGU KUUGU YIMAADA SHAARACA:

- + Haddii ay ku joojaan adiga oo lug ah, waajib maaha inaad ka jawaabto wax su'aal ah, balse bixinta magacaaga, ciwaankaaga, iyo da'daada hadii lagu waydiiyo ( iyo aqoonsigaaga hadii lagu siiyay) waxay kaa caawin kartaa inaan lagu xidhin.
- + Ha doonan shandaada amase jeebka gacanta ha gelin adiga oo aan u sheegin sarkaalka waxaad samayn rabto ( waxay u malayn karaan in aad hub la soo baxayso).

## HADII AAD XIDHANTAHAY:

- + Haddii aad xidhantahay, Boolisku waxa uu xaq u leeyahay inuu baadho adiga iyo inta kugu hareeraysan. Hase ahaatee, waa in aad si xushmad leh u tidhaahdaa "Ma ogoli in la I baadho."
- + Sarkaalku waa inuu akhriyaa xuquuqdaada Mirandaha ka hor intaanu ku baadhin, taaso ay ka mid tahay xuquuqda inaad aamusi karto iyo inaad abukaate dalban karto. Si aad u ilaashato xuquuqdaada aamusnaanta, waa inaad si xushmad leh oo cad u tidhaahda, " Waxaan rabaa inaan aamusnaado" Aamusnaanta laguuma adeegsan karo. Sido kale waa inaad si cad ugu adkaysaa xuquuqdaada abukaate dalbasha tidhaahdana "Waxa aan rabaa in aan la hadlo sharci-yaqaan." Haddii aad ka yartahay 18, waxa aad sidoo kale dalban kartaa in aad la hadasho waalidkaa ama masuulkaaga.

- + Marka aad sheegato dalbashada sharci-yaqaanka ha la hadlin booliska ilaa aad la kulanto abukaataha.
- + Waxa aad xaq u leedahay inaad waydiiso sarkaalka magaciisa iyo numberka aqoonsigiga shaqo. Gaggahaagu ha ahaadaan meel boolisku ka arki karo. Ha is adkayn, ha cararin hana taaban sarkaalka. Is deji oo ha murmin. Haddii gaadhi boolis lagu ag ama dhex dhigo, xitaa hadii boolisku aanu dhawayn oo aad u malaynayso inaad keligaa tahay, ogow in dhici karto in waxaad tidhaahdo la duubayo.
- + Marna ha bixin macluumaad bee ah.
- + Haddii aad haysato telifoon, wakiilada dhaqan-gelinta sharciga looma ogola inay baadhaan iyaga oo sita waaran maahane ama aad adigu u ogolaay.

